

Oggolaanshaha joogitaan ee waxbarasho

Ajinebiga doonaya iney helaan tacliin waxey Norway ka heli karaan oggolaanshaha joogitaan ee waxbarasho.

Si loo helo oggolaansho joogitaan si wax looga barto ama wax looga dhigto Norway waa in:

- **laguu qaato Jaamacad, machad sare, machad sare oo dowli ah, machadka farshaxanka, machad sare ama hal sano oo ah dusiga lagu barto arigtida nolosha.**
- **inaad tacliintaada maalgelin kartid**
- **aad heysato meel ad degto muddada waxbarashada**
- **aad si buuxda waxbarasho ugu jirtid**
- **aad soo bandhigtid qorshe waxbarasho oo dhammeystiran oo ku saabsan tacliinta Norway**

Codsadayaasha ka yimi waddan ka baxsan EU/EØS/EFTA:

Marka aad codsaneyso oggolaanshaha joogitaan ee ardaynimo, waa in dokumentiyadan lala gudbiyaa codsiga:

- Foomka codsiga iyo sawir
- Koobbiga baasaboorka
- Dokumenti aqbalid waxbarasho oo ka timi goob waxbarasho oo la aqoonsan yahay ama dugsi
- Qorshe waxbarasho
- Dokumenti kafaalo qaadid (deyn laga helo khasnadda deynta bixisa ama lacag dhigaal ah oo kuu taal bangi norwiji ah)
- Dokumenti meesha aad deggan tahey

Waana inaad bixisaa qarashka codsiga. Shuruudaha dokumentiga waa u kala duwan yihiin waddamada waana la beddeli karaa. Wixii intaas dheer ee warar ah la xidhiidh saldhigga arrimaha dibeda ee ugu dhow ee norwijiiga ah. Haddii aad joogto Norway, waxaad la xidhiidhi kartaa booliska ama agaasinka ajinebiga (UDI).

Codsadayaasha ka yimi waddan ah EU/EØS/EFTA:

Marka aad codsaneyso oggolaanshaha joogitaan ee ardaynimo, waa in dokumentiyadan lala gudbiyaa codsiga:

- Foomka codsiga ee dadka heysta dhalasho EU/EØS/EFTA iyo sawir
- Dokumenti aqbalid waxbarasho oo ka timi goob waxbarasho Waase shuruud in waxbarashadaani tahay mid xirfad noqoneysa.
- Caddeyn ama soo bandhigid in la is debberayo
- Ceymis bukaan (gaar ah ama E-foom) oo shaqeynaya ilaa muddada waxbarashada oo dhan.

Codsadayaasha ka yimi EU/EØS/EFTA waxey oggolaanshaha ka codsan karaan Norway mana bixinayaan wax kharash ah.

Qofka ugu dhow qoyska codsada wuu u soo raaci karaa Norway. Qofka ugu dhow waxa loo arkaa qofka ey is qabaan ama isla nool yihiin ugu yaraan labo sanadood iyo caruurta. Waxa kale oo intaa dheer sharciyadan:

- Waa inaad masruufi karto xubnaha qoyskaaga (ugu yaraan darajada mushaharka 1 ee heerka mushaharka ee dawladda).
- Xubnaha qoysku waa iney heystaan ceymis bukaan.

Oggolaanshaha waxa la isa siiyaa in le'eg inta ey waxbarashadu socoto, laakiin aan ka badneyn hal sano. Waa la cusbooneysiin karaa oggolaanshaha. Oggolaanshadu waxey ku siineysaa xaq ah inaad ku shaqeysan karto shaqo badhkeed. Dadka kula socda ee ah xubnaha qoyskaaga waxa la siiyaa oggolaansho guud oo ey ku shaqeyn karaan.

Su'aalo caadi ah

Xaggee ayaan ka codsanayaa?

Waaxad ka codsaneyso saldhigga arrimaha dibedda Norway ee kuugu dhow. Codsiga waxaa ka baaraan degeya Agaasinka ajinebiga. Waxaa taas ka baxsan dadka u dhashay waddamada ka tirsan EU/EØS, kuwaas oo soo geli kara Norway oo halkan ka dalban kara. Markaas waxaa loo dirayaa codsiga xafiiska boliiska ee kuugu dhow, codsigana halkaas ayaa lagu eegayaa.

Sidoo kale ardeyda –NORAD waxey soo geli karaan Norway oo halkan ka codsan karaan. Ardeyda – NORAD waxa laga siin kara fiisaha saldhigga arrimaha dibedda haddii shuruudihii oo dhammi buuxaan. Booliska ayaa wuxuu intaa ka dib eegayaa codsiga ku saabsan oggolaanshaha joogitaanka.

Ma kharash ayaa in la codsado oggolaanshaha ardeynimada?

Kharashka la bixinayo marka la codsanayo oggolaansho joogitaan oo ardeynimo waa 1100 oo norwejiyaan koroone. Waxaad bixineysaa marka aad codsigaaga xareyneeyso.

Haddii aad joogto Norway iyo/ama aad codsaneyso cusbooneysiin waxa kharashka la bixinayaa marka cosiga loo gudbinayo booliska (naqad/kaadh). Sidoo kale kharashka waa la sii bixin karaa (xisaabta ayaa laga bixin karaa) dabadeed waa in risiidhka lagu lifaaqo codsiga, ama codsiga ha lagu diro boosta amaba qofku isagu ha xareeyo. Nambarka bangigooda waxa laga heli karaa booliska, lacagta waxa la siinayaa booliska ee lama siinayo UDI.

Haddii codsiga laga dhiibayo Oslo, waxa telifoon loo diri karaa booliska, qeybta ajinebiga halkaas oo laga heli karo nambarka bangigooda. Telifoon nambarka booliska Oslo waa 22 34 21 00.

Waxa kale oo aad halkan ka heli kartaa telifoon nambarada booliska degmooyinka ee Norway.
<http://www.politi.no>

Codsadayaasha ka yimi waddamada EU/EØS ma bixinayaan wax kharash ah.

Wakhti intee le'eg bay qaadataa in laga baraandego codsiga?

Muddada ka baaraandeggidu wey kala duwan tahay. Haddii aad cinwaan ku leedahey Norway waxaa boosta laguugu soo diri doonaa farriin otomaatik ah oo sheegeysa in codsigaagii ey heleen mas'uuliyiinta ajinebigu. Farriintaas waxaa la socota warbixin ah muddada uu qaadano codsiga.

Eeg bogga internetka ee UDI (www.udi.no) ama la xidhiidh xafiiska hawlaha wargelinta ee UDI wixii ku saabsan wararka cusub oo ah norwiji iyo ingiriisi.

Cabasho ma ka qaadan karaa go'aanka?

Haa.cabashadu waa iney sababaysnaataa, haddii aad heysato warbixinio dheeraad ah xasuuso inaad

raacsiiso. Haddii aad cabasho ka qaadata, waxaa cabashada si cusub u eegeysa UDI, haddii ay UDI wax ka bedeli weydo go'aankeedii hore waxa markaa cabashada loo sii gudbinayaa guddiga cabashooyinka arrimaha ajinebiga (UNE). Eegidda cabashadaan waa bilaash (lacag la'aan).

Ma soo kaxaysan karaa qoyskeyga?

Haddii aad haysatid wax ka yar hal sano inta waxbarashadaada Norway kaaga hadhey, ma soo kaxeysan kartid qoyskaaga.

Haddii aad haysatid wax ka badan hal sano inta waxbarashadada Norway kaaga hadhey, waxa la siinayaa oggolaansho joogitaan dadka qoyskaaga ee kuugu dhow taa macnaheedu waxa weeye xaaskkaaga/ninkaaga ama qofka aad isla nooleydeen ugu yaraan labo sano iyo carruurtaada ka yar 18 sano.

Xubnaha qoyskaagu waa iney iskood u codsadaan oggolaanshaha joogitaanka iyagoo soo maraya saldhiga ugu dhow ee arrimaha debeda ee norway.

Waa inaad masruufi karto qoyskaaga una soo hesho meel ey kugula noolaadaan. Shuruudda mushaharka ee ugu yar waa darajada mushaharka 1 ee heerka mushaharka ee dawladda

Xubnaha qoyska ee ardeyda ka timi waddamada EU/EØS wax jira xeerar u gaar ah. Dadka ugu dhow codsadaa waxey u soo raaci karaan Norway. Qoyska kuugu dhow waxa loo arkaa qofka ey is qabaan ama isla nool yihiin ugu yaraan labo sanadood iyo caruurta.

Waxa kale oo intaa dheer xeerarkan:

- Waa inaad masruufi karto xubnaha qoyskaaga (ugu yaraan darajada mushaharka 1 ee heerka mushaharka ee dawladda).
- Xubnaha qoysku waa iney heystaan ceymis bukaan.

Intee in le'eg ayaan joogi karaa Norway?

Waxaa lagu siinaya oggolaansho joogitaan hal sano markiiba. Hal sano ka dib waa in oggolaanshahaas la cusbooneysiyo. Si laguugu cusbooneysiyo waa iney waxbarashadu ahaato mid lagu qanci karo oo kordheysa.

Ma heli kara oggolaanshaha lagu shaqeysto inta aan wax ka baranayo Norway?

Ma helaysid oggolaanshaha lagu shaqeysto oo caadi ah marka aad Norway u timi si ardey ah. Waxaad codsan

kartaa inaad shaqeyso waqti dhimman (ugu badnaan 20 saacadood toddobaadkii) iyo shaqo waqti buuxa fasaxyada. Xarunta waxbarashada waa iney cadeysaa in tani eysan noqon mid kaa horistaageysa habwax-barashadeedkaada. Xaaskaaga /ninkaaga / qofka kula nool waxey codsan karaan oggolaansho la mid ah tan oo kale.

Dadka heysta dhalashada EU/EØS waxey xaq u leeyihiin iney shaqeeyaan ilaa shaqo kala badh ah (halv stilling). Xubnaha qoyska ee kula socda waxa la siinayaa oggolaansho guud si ey u shaqeysan karaan.

Ma qabtaa weli su'aalo dheeraad ah?

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xeerarka, waxaad la xidhiidhi kartaa saldhigga kuugu dhow ee arrimaha dibedda ee Norway. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa booliska ama xafiiska wargelinta ee UDI ee codsabayaasha, telefoonka (+47) 23 35 16 00 ama boostadada elektoroniga ots@udi.no. ama eeg bogga www.udi.no warbixin dheeraad ah oo ah norwiji iyo ingiriisi.